

Macluumaadka soo socda ayaa loo baahan yahay si loo qiimeeyo u-qalmitaankaaga North Dakota Ryan White Part B Program.

- Aqoonsiga/Da'da:** Keen diiwaanada cadeynaya aqoonsigaaga iyo da'dada (tusaale, laysanka darawalnimada).
- Dhakhli:** Keen diiwaanno si aad u muujiso dakhligaaga guud (ka hor intaada canshuurta bixinin) ee dhammaan xubnaha qoyska (tusaale foomka canshuurta ee ugu dambeeyay, jeegagga mushaharka, SSDI, SSI).
- Daganaansho:** Keen diiwaanada si aad u muujiso meesha aad ku nooshahay (liisanka darawalnimada, rasiidhada kirada, biilasha korontada). Waa inaad awood u leedahay inaad tusto aqoonsi gobol 60 maalmood gudahood markaad codsanayo.
- Ceymiska Caafimaadka:** Keen nuqulka ah kaarka caymiska (horey iyo gadaal).
- Medicaid/Medicare:** Keen nuqulka ah kaarkaaga Medicaid iyo Medicare (horey iyo gadaal).

Fadian u buuxi foomkan sida ugu fiican ee aad u ogtahay dokumentiyada ku qoran maamulaha kiiska ee Ryan White. Waxaad sidoo kale fakis ugu diri kartaa **701-328-0338** ama boosto u diri kartaa **Ryan White Part B Program; 600 E Boulevard Ave, Bismarck, ND 58505-0200**. Wixii su'aalo ah, fadian wac 701-328-2378 ama booqo ndhealth.gov/hiv.

Macluumaadka Codsadaha

| | | | | |
|---|--|--|---------|---|
| Goobta Maaraynta Kiiska Ryan White | Lambarka Macmiilka ND Ryan White | Lambarka Macmiilka ND ADAP | | |
| Magaca Koowaad | Magaca Dambe | Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga | | |
| Cinwaanka Wadada | | Magaalada | Gobolka | Koodhka ZIP |
| Cinwaanka boostada (haddii uu ka duwan yahay) | | Magaalada | Gobolka | Koodhka ZIP |
| Lambarka taleefanka Kowaad | Lambarka taleefanka Labaad | Cinwaanka iimayka | | |
| Taariikhda Dhalashada | Wadanka aad u dhalatay | Luuqadda Aasaasiga ah | | |
| Jinsiga <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhedig <input type="checkbox"/> Qof isku beddelay Dhedig <input type="checkbox"/> Qof isku beddelay Lab <input type="checkbox"/> Jinsi kale: | | | | Dadka Jinsiyada kale duwan ee isku galmodaa |
| Qolo (xulo dhammaan inta khuseeysa) <input type="checkbox"/> Aasiyaan <input type="checkbox"/> Hindida Maraykanka <input type="checkbox"/> Madow/Afrikaan Ameerikaan ah <input type="checkbox"/> Dadka daga Jasiirada Baasifiga <input type="checkbox"/> Cadaan | | | | Hisbaanik ama Laatino <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya |
| Magaca Qofka lagala xiriiraya wixii xaalad degdega ah | Lambarka Taleefonka Qofka lagala xiriiraya wixii xaalad degdega ah | Xiriirkha | | |
| Magaca Dhakhtarka | Rugta | Farmashiyaha | | |
| Taariikhda Baadhitaanka Hore Lagugu sameeyay (bisha/sanadka) | | Magaalada/Gobolka ama Dalka (haddii uu ka baxsan yahay Mareykanka) ee Baarista | | |
| Qaybta Khatarta (fadlan dooro dhammaan kuwa khuseeya) <input type="checkbox"/> Nin la galmodaa nin kale (MSM) <input type="checkbox"/> Xiriirkha lab iyo dheddig <input type="checkbox"/> Iisticmaalka daroogada laysku diro (IDU) <input type="checkbox"/> Dadka dhiigooda aan <input type="checkbox"/> Dhalmeda (hooyada iyo ilmaha) <input type="checkbox"/> Beddelka xubinka ama dhiig isku shubid guntamaynin/cudurka xinjirowga <input type="checkbox"/> Aan la aqoonin <input type="checkbox"/> Dhibaatooyinka shaqada laga dhaxla | | | | |
| Xaaladda Jinsiyadda <input type="checkbox"/> Muwaadin <input type="checkbox"/> Degane Joogto ah <input type="checkbox"/> Fiise ku meelgaar ah <input type="checkbox"/> Aan sharciyeysnay | | | | |
| Xaaladda Shaqada <input type="checkbox"/> Shaqaale waqtii buuxa <input type="checkbox"/> Shaqaale waqtii dhiman <input type="checkbox"/> Iskii u shaqeysta <input type="checkbox"/> Shaqa la'aan <input type="checkbox"/> Hawl gab <input type="checkbox"/> Naafso <input type="checkbox"/> Arday | | | | |
| Magaca Loo-shaqeeyaha | | | | |

Macluummaadka Caymiska

Dooro nooca caymiska caafimaadka ee aad hadda haysato oo keen nuqlka ah kaarka caymiska (horey iyo gadaal).

| Caymiska Gaarka loo leeyahay | Medicaid | Medicare | Caymis kale | <input type="checkbox"/> Caymiska Suuqa oo uu bixiyo barnaamijka Ryan White | <input type="checkbox"/> Ma lihi wax caymis caafimaad tan iyo (taariikhda): |
|--|---|--|--|--|---|
| <input type="checkbox"/> Loo shaqeeyaha ku salaysan <input type="checkbox"/> Shaqsi gaar loo leeyahay <input type="checkbox"/> Ilkaha <input type="checkbox"/> Araga <input type="checkbox"/> Waxkale: | <input type="checkbox"/> Dhaqan <input type="checkbox"/> Ballaarinta <input type="checkbox"/> Labada geesood u-qalma (Medicaid/Medicare) | <input type="checkbox"/> Qaypta A/B <input type="checkbox"/> Qaypta D (caymiska daroogada) | <input type="checkbox"/> VA <input type="checkbox"/> IHS <input type="checkbox"/> Nooc kale: | Haddii la xushay, fadlan buuxi Baadhitaanka Caymiska Caafimaadka iyo Caddaynta | |
| Magaca Bixiyaha Caymiska (tusaale, BCBS) | | Aqoonsiga Xubinka | | Taariikhda Bilowga Siyaasadda | |
| Magaca Bixiyaha Caymiska (tusaale, BCBS) | | Aqoonsiga Xubinka | | Taariikhda Bilowga Siyaasadda | |

Baadhitaanka Caymiska Caafimaadka iyo Caddaynta

Fadlan dhammaystir qaybtan haddii aadan hadda lahayn caymis caafimaad ama aad ka diiwaangashan tahay Caymiska Caafimaadka Suuqa ee uu bixiyo barnaamijka Ryan White.

| | |
|--|-----------|
| <input type="checkbox"/> Dakhligaygii 12kii bilood ee la soo dhaafay wuxuu ka hooseeyaa \$20,000. <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Waaan codsaday ND Medicaid 6-dii bilood ee la soo dhaafay waxaana la iigu diiday sababo la xiriira: <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Dakhli <input type="checkbox"/> Heerka dhalashada/socdaalka <input type="checkbox"/> Inaan qabo codsi aan dhammaystirnay <input type="checkbox"/> Ma codsan ND Medicaid 6-dii bilood ee la soo dhaafay. | |
| <input type="checkbox"/> Dakhligayga 12kii bilood ee la soo dhaafay wuxuu ka sarreeyaa \$20,000. Aniga, ama xubnaha kale ee reerkayga, ayaa shaqeeya laakiin: <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Loo-shaqeeyahaagu ma bixiyo caymis caafimaad. <input type="checkbox"/> Ma jiro qof ka tirsan qoyskayga oo la siinayo caymis caafimaad iyada oo loo marayo shaqo aan anigu ka mid ahay. Dhammaan xubnaha shaqeeya ee reerka waa in loo-shaqeeyaha uu buuxiyo Qalabka Caymiska Loo-shaqeeyaha. | |
| Haddii aad u-qalantid oo aadan ka helin caymis caafimaad Medicaid, Medicare ama Qorshaha Ku-saleysan Loo-shaqeeyaha Gaarka ah, uma hoggaansanid xeerarka Ryan White Part B ee ku saabsan "bixiyaha meesha ugu dambaysa." Tani waxay kaa dhigi doontaa mid aan u qalmin Adeegyada Caymiska ee Ryan White ilaa caymis habboon laga helo. Tixgelin ayaa la samayn doonaa si loo bixiyo daawooyin iyo adeegyo ilaa iyo saddex bilood si loo daboolo adeegyada illaa qorshuhu noqdaan kuwo firfircoo | |
| Haddii aad codsatay oo aadan u qalmin Medicaid, Medicare ama Qorshaha Ku-saleysan Loo-shaqeeyaha Gaarka ah, waa inaad iska qortaa qorshe caafimaad oo aqoon leh iyada oo loo marayo Suuqa Caymiska Caafimaadka oo leh qorshe la ansixiyey Ryan White muddada diiwaangelinta furan ee xigta. Barnaamijka Ryan White ayaa bixin kara qayptaada caymiska. Ku guul darreysiga diiwaangelinta qorshaha caymiska caafimaadka inta lagu jiro xilliga is-diwaangelinta ee soo socota waxay ku dambayn doontaa hakin hal sano ah barnaamijka Ryan White Part B ama ilaa caymiska caafimaadka la helo. | |
| (fadlan xarafka magaca ugu horeeya) Waaan fahamsanahay in barnaamijka Ryan White Part B uu yahay bixiyaha ugu dambeeya waxaana laga yaabaa inuu daboolo adeegyada marka uusan jirin bixiye kale oo la heli karo. Tani waxay ka dhigan tahay haddii aan u-qalmo caymiska caafimaadka oo aanan is-diwaangelin, Ryan White wuxuu joojin doonaa u-qalmitaankayga Ryan White Part B ilaa aan ka helo caymis habboon. | |
| Maareeyayaasha Kiiska: <ul style="list-style-type: none"> <input type="checkbox"/> Codsadahaani hadda uma qalmo wax caymis caafimaad ah wuxuuna u qalmaa adeegyada Ryan White. <input type="checkbox"/> Kani waa codsadaha u-qalma caymiska caafimaadka dadweynaha ama kuwa gaarka loo leeyahay waana inuu helaa 3 bilood muddada daaqadda RW ee ku eg dhammaadka: _____. <input type="checkbox"/> Macmiilkani uma hoggaansamayo Xeerarka Ryan White mana u-qalmo adeegyada Ryan White. | |
| Saxiixa Macmiilka/Mas'uulka | Taarikhda |
| Saxiixa Maareeyaha Kiiska | Taarikhda |

Astaamaha Qoyska

| | |
|---|---|
| Nooca Guryaha (fadlan mid dooro) | <input type="checkbox"/> Guryaha joogtada ah (abaarto, guri, hoy la seexdo) <input type="checkbox"/> Kiro <input type="checkbox"/> Leh |
| | <input type="checkbox"/> Ku-meelgaar ah (guri ku-meelgaar ah oo loogu talagalay hoylaaweyaasha, la joogista saaxiibbada ama qoyska) |
| | <input type="checkbox"/> Degganaansho la'aan (hoy degdeg ah, xabsi, baabuur, waddooyin, huteel ama muteelka lagu bixiyey maalgelinta degdegga ah) |
| Ma heshaa kaalmo guri (HOPWA, guryaha dadweynaha, Qeybta 8)? <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Haa, fadlan sheeg: | |
| Sharaxaad ka bixi hab-nololeedka hadda jira (xasiloonda, nabdoonaanta, la-awoodi karo) Kharash/bishii | |
| 12-kii bilood ee la soo dhaafay, maxay ahayd xaaladda guriga ee aan degganayn ee aad la kulantay? | |
| <input type="checkbox"/> Hoylaawe ama degenaansho aan <input type="checkbox"/> Guri ku meel gaar ah <input type="checkbox"/> Guri deggan ama joogto ah xasiloonayn | |

Tirada iyo Dakhliga Qoyska

| | | | | | |
|---|------------------------------------|--|-----------------------------------|---|-------------------------------------|
| Heerka Guurka | | | | | |
| <input type="checkbox"/> Kali | <input type="checkbox"/> Guursaday | <input type="checkbox"/> Si sharci ah u kala tagay | <input type="checkbox"/> La furay | <input type="checkbox"/> Laga dhintay | <input type="checkbox"/> Nooc kale: |
| Qor xubin kasta oo qoyskaaga ah oo kula nool (xaaska sharciga ah, bayoolaji/korsaday/ilmo dhaleen) iyo qof kasta oo aad sheeg ato inuu ku tiirsan yahay canshuurahaaga. Qor canshuurtooda haddii ay khuseeyso. Ku lifaaq xaashiyo dheeraad ah haddii loo baahdo . | | | | | |
| Magac | Xiriirkha | Taariikhda Dhalashada | Nooca Dakhliga | Dakhliga Guud ee Billaha ah (intaada canshuurta bixinin ka hor) | |
| | Naftayda | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| Tirada Dadka Ka Kooban Reerka | | Wadarta Dakhliga Qoyska Bilaha ah | | | |
| Heerka Saboolnimada Federaalka ee Qoyska (oo uu dhammaystiri doono maareeyaha kiiska) | | | | | |

Bayaanka Dakhli La'aan

| |
|---|
| Haddii aadan hadda qabin dakhli, fadlan buuxi macluumaadka soo socda. |
| <input type="checkbox"/> Anigu ma xarayn canshuurta dakhliga 20 _____. Hadalkani waa run intaan ogahay. |
| <input type="checkbox"/> Hadda ma haysto wax dakhli ah mana aanan helin dakhli tan iyo: |
| Fadlan sharax sida kharashyadaada nolosha loo daboolo haddii aadan soo sheegin dakhli hadda jira. |

Qiimaynta Adeegyada Ryan White

| | |
|---|---|
| Fadlan dooro adeegyada ND Ryan White iyo lacag-celinta adeegga ee aad u baahan tahay. | |
| <input type="checkbox"/> Maaraynta Kiiska | <input type="checkbox"/> Daawooyinka (ADAP) |
| <input type="checkbox"/> Daryeelka caafimaadka HIV ee bukaan-socodka | <input type="checkbox"/> Lacagaha caymiska (ADAP) |
| <input type="checkbox"/> Daryeelka ilkaha | <input type="checkbox"/> Daryeelka araggaa |
| <input type="checkbox"/> Caafimaadka dhimirka | <input type="checkbox"/> Kaabayaasha nafaqada |
| <input type="checkbox"/> Gargaarka kirada iyo kaalmada | <input type="checkbox"/> Gaadiidka |
| <input type="checkbox"/> Kooxaha Taageera HIV | |
| Caymis kale | |

Qiimaynta Baahiyaha Aasaasiga ah

Fadlan dooro meelaha aad u baahan tahay gudbinta iyo caawimada.

- | | |
|---|---|
| <input type="checkbox"/> Guriga/adeegyada | <input type="checkbox"/> Xaalada dhalashada/socdaalka |
| <input type="checkbox"/> Biilasha caafimaadka | <input type="checkbox"/> Caqabadaha luuqadda/dhaqanka |
| <input type="checkbox"/> Cuntada iyo dharka | <input type="checkbox"/> Arrimaha sharciga/xabsiga |
| <input type="checkbox"/> Bixinta biilasha/maaraynta lacagta | <input type="checkbox"/> Raadinta/haysashada shaqo |

Caymis kale

Ku-haynta Daryeelka iyo Qiimaynta Halista HIV

Goorma ayay ahayd booqashadii ugu dambeysay ee aad la yeelato bixiyahaaga HIV?

- 6 bilood ee la soo dhaafay 12 bilood ee la soo dhaafay gudahood In ka badan 12 bilood

Hadda si cad ma loo jejebiyay?

- Haa Maya Ma aqaani

CD4-gaagu ma ka badan yahay 200 unug/mL?

- Haa Maya Ma aqaani

Waa maxay dawooyinka HIV ee aad hadda qaadato?

Miyaad seegtay wax qiyaas ah 12kii bilood ee la soo dhaafay?

- Maya Haa, sheeg:

Miyaad waligaa samaysay galmo aadan difaac gashanin, lammaaneyaal badan ama si qarsoodi ah, ula wadaagtay cirbado qof 12kii bilood ee la soo dhaafay? Maya Waan diiday inaan ka jawaabo Haa, fadlan sheeg:

Baadhitaaanada lagu taliyay dadka qaba HIV

Miya lagaa baaray waraabow 12-kii bilood ee la soo dhaafay?
 Haa Maya Galma ahaan ma firfircooni

Taariikhda lagu baaray

Natiijada baarista

Miya lagaa baaray kalmiidiya iyo jabtada 12-kii bilood ee la soo dhaafay?
 Haa Maya Galma ahaan ma firfircooni

Taariikhda lagu baaray

Natiijooyinka baarista

Hadda uur miyaad leedahay?

- Haa Maya Ma khuseeyo

Hadday haa tahay, miyaad helaysaa daryeelka dhalmada ka hor?
 Haa Maya

Taariikhda geynta la qiyaasay

Isticmaalka Maandooriyaha iyo Qiimaynta Caafimaadka Dhimirka

Ma tahay qof isticmaala tubaako?

- Haa Maya Hore

Ma xiisaynaysaa inaad joojiso waqtigan?

- Haa Maya Ma khuseeyo

Miyaad tahay qof uu ku boxo qiiq sigaarka?
 Haa Maya

Miyaad hadda si xun u isticmaashaa mukhaadaraadka ama khamriga?

- Haa Maya Iisticmaal hore

Hadday haa tahay, calaamadee dhammaan wixii khuseeya
 Khamriga Wadada Daawada laguu qoray Duritaan

Ma jeelaan lahayd in lagu gudbiyo?

- La-talinta Isticmaalka Maandooriyaha Adeega Sayriinkja Joojinta Tubaakada Maya Ma khuseeyo

Faallooyinka

Ma qabtaa welwel xagga caafimaadka dhimirka ah?

- Haa Maya Hore

Faallooyinka

Miyaad qabtaa jaah-wareer taariikhi ah noloshaada?

- Haa Maya

Miyaad qabtaa walaac xadgudub jidheed ama shucuureed?

- Haa Maya, Waxaan dareemayaan nabdoonaan

Ma heleysaa la-talin/daaweyn?

- Haa Maya Ma khuseeyo

Ma xiisaynaysaa inaad hesho kaalmo?

- Haa Maya Ma khuseeyo

Waa inuu Dhamaystiro Maareeyaha Kiiska – Miisaanka Maqnaanshaha

| Aagga Nolosha & Natijjada | 0 dhibcood Is-maareyn(Mgmt.) | 1 dhibic Baahi Aasaasi ah | 2 dhibcood Baahi Dhaxdhaxaad ah | 3 dhibcood Baahi Daran |
|---|--|---|---|---|
| Maareynta Kiiska Caafimaadka | | | | |
| Xiriirinta iyo Ku Haynta Daryeel Caafimaad Dhibcaha Darnaanta: | <input type="checkbox"/> Macmiilku wuxuu ka qaygalay dhammaan ballamaha caafimaadka HIV 12kii bilood ee la soo dhaafay. | <input type="checkbox"/> Macmiilku wuxuu seegay hal ballan 12kii bilood ee la soo dhaafay ama wuxuu dib u dhigay ballamo badan. | <input type="checkbox"/> Macmiilka ayaa seegay in ka badan hal ballan caafimaad 12kii bilood ee la soo dhaafay. | <input type="checkbox"/> Ma jiro wax sheybaar ah oo la helay 12kii bilood ee la soo dhaafay. Macmiilku waa: <input type="checkbox"/> qof hadda mardhaw la daaweyay <input type="checkbox"/> uur leh <input type="checkbox"/> difaaca jirkisu liito <input type="checkbox"/> laga siidaayaa xarunta asluubta 90-kii maalmood ee la soo dhaafay <input type="checkbox"/> ayaa sbitaal la dhigay ama isticmaalay ER ama daryeel degdeg ah 30-kii maalmood ee la soo dhaafay |
| Fahmaa HIV & Dabeecadda Halista Dhibcaha Darnaanta: | <input type="checkbox"/> Fahmaa khataraha & dhaqammada waxay waxyelleeyaan hab - dhiska dhimista waxayna kala sheekaystaan lamaanayaasha galmaada ku saabsan galmaada badbaadada ah (tusaale isticmaalka kondomka, PrEP, baaritaanka) | <input type="checkbox"/> Wuxuu fahmaa khataraha iyo dhaqammada waxyella dhimista ah inta badan. | <input type="checkbox"/> Wuxuu qabaa aqoon liidata oo ku lug leh dabeecado halis ah. Xamuulka fayraska waa la ogaan karaa. Wuxuu u baahan yahay adeegyo shuraako. | <input type="checkbox"/> Si joogto ah ugu lug leh dabeecado halis ah. Fayraska lama dilin. Khatarta sare oo ah dhanka gudbinta HIV. Wuxuu u baahan yahay adeegyo shuraako. |
| U hoggaansamida Daawada Dhibcaha Darnaanta: | <input type="checkbox"/> U hoggaansanaanta daawada oo dhammaystiran ayaa ka muuqata culeyska fayraska aan la ogaan karin. | <input type="checkbox"/> Wuxuu seegaa kuurooyinka marmar iyadoo la sii wado xakamaynta culeyska fayraska. | <input type="checkbox"/> Kuurooyinka si joogto ah ayuu u seegaa. Wuxuu qabaa culeys fayras oo la ogaan karo oo ka hooseeya 200 nuql/mL. | <input type="checkbox"/> Waxay seegtaa kuuraha maalin kasta waxayna leedahay culeys fayras oo ka badan 200 nuql/mL. Wuxuu u baahan yahay inuu u hoggaansomo la-talinta. |
| Caymiska Caafimaadka Dhibcaha Darnaanta: | <input type="checkbox"/> Qabaa caymis caafimaad. Awood u leeyahay inuu isticmaalo daryeel caafimaad. | <input type="checkbox"/> Ka diiwaangashan caymiska caafimaadka laakiin u baahan taageero si loo ilaaliyo caymiska. | <input type="checkbox"/> Qabaa caymis caafimaad laakiin wuxuu u baahan yahay kaalmada qaaliga ah ee ADAP iyo taageerada CM si loo ilaaliyo caymiska. | <input type="checkbox"/> Ma jiro caymis caafimaad. <input type="checkbox"/> Uma qalmo caymiska dadweyne ama kuwa gaarka loo leeyahay. <input type="checkbox"/> U qalma laakiin aan la diwaangelinin. |
| Maaraynta Kiiska ee aan Caafimaadka ahayn | | | | |
| Baahiyaha Aasaasiga ah Dhibcaha Darnaanta: | <input type="checkbox"/> Cuntada, dharka, iyo waxyaabaha kale ee aasaasiga ah ayaa laga heli karaa macmiilka. <input type="checkbox"/> Qabaa helitaan joogto ah barnamijyada gargaarka oo si joogto ah u ilaaliya baahiyaha aasaasiga ah. <input type="checkbox"/> Awood u leh inuu fuliyo waxqabadyada nolol maalmeedka si madaxbannaan (ADL) | <input type="checkbox"/> Baahiyaha aasaasiga ah si joogto ah loo daboolay iyada oo marmar loo baahan yahay in laga caawiyo helitaanka barnamijyada gargaarka. <input type="checkbox"/> Aan awoodin in si joogto ah loo daboolo baahiyaha aasaasiga ah iyada oo aan la helin gargaar degdeg ah. <input type="checkbox"/> U baahan kaalmo si loo sameeyo xoogaa ADL toddobaadle ah. | <input type="checkbox"/> Caadiyan waxay u baahan tahay caawimo helitaanka barnamijyada gargaarka ee baahiyaha aasaasiga ah. <input type="checkbox"/> Taariikhda dhibaatooyinka ku saabsan helitaanka barnamijyada gargaarka kaligeed. <input type="checkbox"/> Badanaa w/o cuntada, dharka, ama baahiyaha kale ee aasaasiga ah. <input type="checkbox"/> Wuxuu u baahan yahay kaalmada ADL ee guriga dhediisa ah maalin walba. | <input type="checkbox"/> Ma heli karo cunto. <input type="checkbox"/> Iyadoo aan la haysanin baahiyaha aasaasiga ah intooda badan. <input type="checkbox"/> Awood uma laha in uu qabto ADL inta ugu badan. <input type="checkbox"/> Ma jiro guri caawimaad laga helo ee ADL. |

| Aagga Nolosha & Natijjada | 0 dhibcood Is-maareyn(Mgmt). | 1 dhibic Baahi Aasaasi ah | 2 dhibcood Baahi Dhaxdhaxaad ah | 3 dhibcood Baahi Daran |
|---|--|---|---|---|
| Caafimaadka dhimirka <i>Dhibcaha Darnaanta:</i> | <input type="checkbox"/> Ma jiraan Taariikh dhibaatooyinka ah caafimaadka dhimirka. Uma baahna in la sii gudbiyo. | <input type="checkbox"/> Dhibaatooyinkii hore iyo/ama ka warbixiyey dhibaatooyinka/walbahaarka hadda jira - oo shaqeynaya ama horeba ugu hawlanaa daryeelka caafimaadka dhimirka. | <input type="checkbox"/> Dhibaato ka haysato hawl-maalmeedka. Wuxuu u baahan yahay taageero la taaban karo. Wuxuu u baahan yahay in loo gudbiyo daryeel caafimaadka dhimirka. | <input type="checkbox"/> Khatar ku ah naftaissa ama dadka kale waxayna u baahan tahay wax ka qabasho degdeg ah. Wuxuu u baahan yahay in loo gudbiyo daryeel caafimaadka dhimirka. |
| Isticmaalka Maandooriyaha <i>Dhibcaha Darnaanta:</i> | <input type="checkbox"/> Wax dhib ah kuma qabo isticmaalka maandooriyaha. Wax gudbin ah looma baahnio. | <input type="checkbox"/> Dhibaatooyinkii hore laakiin hadda soo kabashada. Saamayn kuma lahan kartida hawl-maalmeedka ama helitaanka daryeel caafimaad. | <input type="checkbox"/> Isticmaalka maandooriyaha ee hadda jira - diyaar u ah inuu raadsado caawimo. Waxay saamayn ku yeelanaysaa awooda shaqaynta iyo helitaanka daryeelka caafimaadka. | <input type="checkbox"/> Isticmaalka maandooriyaha ee hadda jira - ma rabo inuu raadsado caawimo. Awoodin inuu shaqeeyo maalin kasta ama sii wado daryeelka caafimaadka. |
| Guryaha <i>Dhibcaha Darnaanta:</i> | <input type="checkbox"/> Ku noolaanshaha guri nadiif ah oo deggan. Uma baahna gargaar. | <input type="checkbox"/> Guri deggan (kaabid ama aan kaabaynin). Marmar waxay u baahan tahay kaalmada guriga (<2 jeer sannadkii). | <input type="checkbox"/> Guri ku meelgaar ah (kabitaan ama aan kaabaynin). Xadgudubyada soo noqnoqda iyo ogeysiisiyada guri ka saaridda iyo taariikhda hoyla'aanta. | <input type="checkbox"/> Guri aan degganayn. Hadda wajahaya guri ka saarid ama hoy la'an. |
| Caqabadaha Luuqadda iyo Dhaqanka <i>Dhibcaha Darnaanta:</i> | <input type="checkbox"/> Ma jiraan Caqabado luuqadeed/dhaqan. | <input type="checkbox"/> Qaar ka mid ah caqabadaha luuqadda/dhaqanka oo aan si weyn u saamayn helitaanka daryeel caafimaad ama adeegyo. | <input type="checkbox"/> Caqabadaha luuqadda & dhaqanka ee u diidayaa macmiilka inuu helo daryeel caafimaad iyo adeegyo. | <input type="checkbox"/> Caqabadaha luuqadda/dhaqanka. Macmiilku ma awoodo inuu helo daryeel caafimaad ama daaweyn la'an adeegyo turjumaad iyo caawimada CM. |
| Gaadiidka <i>Dhibcaha Darnaanta:</i> | <input type="checkbox"/> Waxay leedahay marin joogto ah oo la isku hallayn karo oo gaadiid ah oo aan u baahnayn taageero wakaalad. | <input type="checkbox"/> Marmar waxay u baahan tahay kaalmada gaadiidka si ay ugu sii jirto daryeelka caafimaadka. | <input type="checkbox"/> Qabo baabuur ama bas laakiin wuxuu u baahan yahay kaalmada CM ee isku dubaridka iyo dib u bixinta gaadiidka. | <input type="checkbox"/> Xaddidan ama aan lahayn marin gaadiid (luqad, kartida garashada, caafimaadka maskaxda) taas oo saamaynaysa helitaanka daryeelka caafimaadka iyo adeegyada. |
| Wadarta Dhibcaha: | Isku dar dhibcaha wadarta leen kasta si aad u ogaato wadarta 0 dhibcood: Is-Maareynta 11-20 dhibcood: Maareynta Kiiska Dhexdhexaadka ah 21-30 dhibcood: Maareynta Kiiska Xooga leh | | | |
| Ogsoonoow: | | | | |

La-talinta iyo Qof Gudbinta waxaa bixiya (maamulayaasha kiiska)

| | |
|--|---|
| U gudbi qofka daryeelka caafimaadka HIV <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma khuseeyo | U gudbinta qofka adeegyada diiwaangelinta caymiska caafimaadka <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma khuseeyo |
| La-talinta yareynta halista HIV-ga ayaa la bixiyay <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma khuseeyo | La-talinta u hoggaansanaanta daawada ayaa la bixiyay <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma khuseeyo |
| U gudbinta qofka adeegyada isticmaalka mukhaadaraadka <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma khuseeyo | U gudbinta qofka adeegyada caafimaadka dhimirka <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma khuseeyo |
| U gudbinta qofka adeegyada bulshada <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma khuseeyo | U gudbinta qofka adeegyada guryaha <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma khuseeyo |
| Gudbinada kale ee qofka | |

ND Ryan White Part B Program Xuquuqda Iyo Mas'uuliyadaha

Xuquuqda Macmiilka:

Adigoo ah ka-qaybgale ka tirsan ND Ryan White Program Part B, waxaad xaq u leedahay in:

- Laguula dhaqmo si xushmad leh, sharaf leh, tixgelin iyo naxariis leh.
- Inaad hesho adeegyada maareynta kiiska In laguula dhaqmo si xushmad leh, sharaf leh, tixgelin leh, iyo naxariis leh.
- Inaad hesho adeegyo maareyn kiis oo xor ka ah takoor ku saleysan qolo, midab, jinsi/jandar, qowmiyad, asal qaran, diin, da', dabaqad, nooca galimada, awooda jirka iyo/ama awooda maskaxda.
- Inaad ka qaybqaadato qorshe abuuris oo loogu talagalay adeegyada maaraynta kiiska.
- In lagula socodsiiyo adeegyada iyo xulashooyinka aad heli kartid.
- Inaad la heshiiso maareeyaha kiiskaaga si aad ugala hadasho inta jeer ee xiriirka aad la yeelan doonto, ha ahaato qof ahaan ama taleefan.
- In lagaaga dhigo kuwo qarsoodi ah diiwaanadaada caafimaad iyo diiwaanada maareynta kiiska.
- In xareysato cabasho ku saabsan adeegyada aad heleyso ama kuwa laguu diiday

Mas'uuliyadaha Macmiilka:

Ka-qaybgale ahaan North Dakota Ryan White Program Part B, waxaad mas'uul katahay inaad:

- Ula dhaqanto macaamiisha kale iyo shaqaalaha wakaaladdan si ixtiraam iyo xushmad leh.
- Ilaaliso qarsoodinimada macmiisha kale ee aad kula kulmi karto wakaaladdan.
- Ku samaynin maamulayaasha kiiska, shaqaalaha, ama macaamiisha kale wax jirdil ah, galmo ah, hanjabaad af iyo/ama caadifad ah.
- Ka qaybqaadato inta aad awooddo inaad ku samayso samayn qorshaha maareynta kiiska.
- U sheegto maareeyaha kiiskaaga wixii welwel ah ee aad ka qabto qorshaha maareynta kiiskaaga ama isbeddelada baahiyahaaga.
- Sameyso oo u ilaaliso ballamaha sida ugu fiican ee aad awooddo, ama haddii ay suurtogal tahay, taleefan si aad u baajiso ama aad u beddesho wakhtiga ballanta.
- Xiriir la lahaato maareeyaha kiiskaaga adiga oo ku wargelinaya isaga/iyada isbeddellada aad ku samaysay cinwaankaaga ama lambarka taleefankaaga, dakhligaaga, iyo ka jawaabidda wicitaannada maareeyaha kiiska ama waraaqaha sida ugu wanaagsan ee aad awooddo.
- Siiso maareeyaha kiiskaaga wixii codsiyo ah ee bixinta biilasha 30 maalmood gudahood taariikhda bayaanku aadna keento dokumentiyada loo baahan yahay.
- Raacdo tilmaamaha uu ku siiyo maareeyaha kiiska si aad gargaar uga hesho barnaamijyada iyo adeegyada kale ee jira.
- Daryeelka kusii nagaato adiga oo si joogto ah u booqanaya dhakhtarkaaga oo qaadanaya dawooyinka laguu qoray si loo hubiyo caafimaadkaaga iyo ladnaantaada.
- Lixdii billoodba kasta mar dib aad dib u xaqiijiso u -qalmitaankaaga iyo iska diwaangelinta barnaamijka ND Ryan White Part B. Waa **inaad dib iskaga diwaangelisaa Abriil 30-keeda oo aad xaqiijisaa Oktoobar 31-deeda** sannad kasta si aad u sii wadato u-qalmitaanka Ryan White.

Waan fahmay macluumaadka kor ku qoran, waxaana la i siiyay nuqul ah diiwaankayga.

| | |
|-----------------------------|-----------|
| Saxiixa Macmiilka/Mas'uulka | Taarikhda |
| Saxiixa Maareeyaha Kiiska | Taarikhda |

ND Ryan White Program Part B Siideynta Xogta Macmiilka

Aniga oo ah, _____, waxaan oggolaaday shaqaalaha ND Ryan White Program ama wakiiladooda inay kala hadlaan kiiskayga iyo ogaanshahayga (haddii loo baahdo) bixiyeyaasha ku taxan si aan u helo oo aan u sii wado adeegyada aan u qalmi karo:

| | |
|--|-------------------------|
| Maareeyayaasha kiiska | Garyaqaano |
| Shaqaalaha maaliyadda ee degmada | Wakiilka Medicaid ee ND |
| Dhakhtar | Shaqaaale rug |
| Caawiyayaasha diiwaangelinta caymiska | Bixiyeyaasha caymiska |
| Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka kale (farmashiistaha, dhakhtarka ilkaha, iwm.) | Shaqaalaha bulshada |

Waxaan sidoo kale u oggolaaday barnaamijka ND Ryan White inuu ka hubiyo caymisyada gaarka loo leeyahay iyo loo-shaqeeyayaasha wixii ku saabsan caymiska caafimaadka ama kan ilkaha ee laga yaabo inaan qabo. Oggolaanshahan waxaa loogu talagalay ujeeddada kaliya ee helitaanka taariikhaha macluumaadka u-qalmitaanka iyo macluumaadka qaaliga ah si looga caawiyo khidmadaha caymiska iyo hubinta caymiska caafimaad ee habboon.

Ogolaanshahani wuxuu dhacayaa hal sano laga bilaabo taariikhda saxiiyaga. Waan ka laaban karaa oggolaanshahan wakhti kasta aniga fariin u diraya barnaamijka ND Ryan White. Haddii aan ka noqdo oggolaanshahan, shaqaalaha barnaamijka ND Ryan White iyo dadka kor lagu tilmaamay waxay ku dhaqmi karaan macluumaadkayga la sii daayay ilaa taariikhda ka noqoshadaas.

Waxaan fahamsanahay in macluumaadka aniga igu saabsan ay dhawraan sharchiyada gaarka ah ee gobolka iyo federaalka. Waxaan fahamsanahay in macluumaadkaan aan la sii deyn karin oggolaanshahayga la'aanteed, marka laga reebo sida uu sharcigu qabo.

Waxaan fahamsanahay in aanan qasab ahayn inaan saxiixo foomkan oggolaanshaha. Haddii aan doorto inaan saxyixin foomkan, waxay yareyn kartaa ama xakamayn kartaa adeegyada la ii siin karo. Haddii aan saxiixo foomkan, waxaan xaq u leeyahay inaan helo nuqluka oggolaanshaha la dhammaystiray.

| | |
|-----------------------------|-----------|
| Saxiixa Macmiilka/Mas'uulka | Taarikhda |
| Saxiixa Maareeyaha Kiiska | Taarikhda |

Shaqaadada ND Ryan White Program Part B

Waxaan halkan ku caddaynayaa in matalaadda dakhligayga, caymiskayga iyo kaalmada dhaqaale ee kale ay tahay bayaan run ah oo sax ah iyo in shuruudaha u-qalmitaanka sida kor ku qoran la buuxiyey oo la diiwaangeliyey.

Waan fahamsanahay Xuquuqahayga iyo Mas'uuliyadahayga, oo ay ku jiraan dhammaystirka dukumintiga u-qalmitaanka 6 -dii biloodba mar, iyo u soo sheegidda isbeddellada ku yimaada dakhliga, xaaladda caymiska, ama degganaanshaha maamulaha kiiskayga isla markiiba.

Waxaan fahamsanahay inay tahay inaan **sannad walba dib isu diwaangeliyo illaa Abriil 30 oo aan dib u xaqiijiyo Oktoobar 31 si aan ugu sii qalmo.** Haddii aan sidaas yeeli waayo, waxaan noqon doonaan qofaan u-qalmin inaan adeegyada ka helo ND Ryan White Program.

| | |
|-----------------------------|-----------|
| Saxiixa Macmiilka/Mas'uulka | Taarikhda |
| Saxiixa Maareeyaha Kiiska | Taarikhda |